

Tababar ku saabsan Xalalka waara oo loogu talagalay Bulshooyinka uu Barakacu Saameyey ee Somalia

Koorsada 2aad. Kulanka 3aad:Qiimaynta iyo cabirka xalalka waara

Faallo Kobaan

Xog wanaagsan oo dhameystiran oo la wadaagay iyo falanqeyn ayaa muhiim u ah in lagu kabo qorshaynta wadajirka / natiijooyinka qorshaynta xalalka ku saleysan aagga. Aagga la xushay wuxuu noqonayaa barta laga soo bilaabo xog ururinta iyo falanqaynta. Falanqaynta waa in lagu daro isbarbardhiga xaaladaha iyo sifooyinka qaybaha kala duwan ee dadweynaha iyo sidoo kale sifooyinka gaarka ah ee aagaga ay ay ku nool yihiin, sida awooda adeegga iyo kaabayaasha laga helo. Kulankaan wuxuu fursad u noqon doonaa in looga jawaabo su'aalaha soo socda:

Maxaan ugu baahanahay xog, macluumaad iyo falanqeyn ku saabsan bulshooyinka uu saameyey barakaca iyo aagga?

Xog noocee ah ayaan u baahanahay?

Maxay yihiin nidaamka farsamo ee loo marayo iyo aaladaha loo adeegsado in lagu fuliyo gorfeyn ku saleysan aag ayadoo lagu saleysanayo xog dhameystiran, mustaqbalka fog, xog la wadaago loo wada dham yahay?

Ujeedooyiinka

Dhamaadka kulanka, ka qaybgalayaashu waxay awoodi doonaan inay:

- Sharaxaan sababta iyo nooca qiimeynta muhiimka u ah in la sameeyo qorshe xalalka waara ah iyo in la cabbiro horumarka loo qaadayo xagga xalalka waara
- Baaraan nooca xogta iyo falanqaynta aan u baahanahay si aan u sameyno falanqeynta xalalka waara oo loogu talagalay sameynta barnaamijyo wanaagsan oo loogu talagalay bulshooyiinka uu saameyey barakacu ee dalka Soomaaliya
- Baaraan agabka iyo qalabka kala duwan ee loo sameeyay si loo qiimeeyo loona cabbiro horumarka ku aaddan xalalka waara ee dalka Soomaaliya.

Fariimaha Muhimka ah

1. **Falanqeyn xalal waara oo ku saleysan xog adag,cusub oo la wadaagay ayaa fure u ah in lagu kabo horumarinta qorshe xalalka waara ee diirada la saaray.**
2. **Falanqeyn xalal waara oo xeel dheer waa inay ku koobnaataa xog kala duwan oo ku saabsan dadka barakacu saameyey, dhinaca baahida, iyo meesha, dhanka saadka.**
3. **Falanqaynta noocan oo kale ah waa inay awood u siisaa ururada hawl wadeenada ka qeyb qaadanaya qorshaha xalalka waara si laysugu barbardhigo xaaladaha barakacayaasha iyo martigaliyayaasha, si loo ogaado kuwa ugu nugul isla markaana loo tixgeliyo arrimaha gaarka ah ee ay wadaagan iyo arrimaha gaarka u ah barakac kasta si wax loogaga qabto qaab istiraatiiji ah.**
4. **Qaab-dhismeedka ReDSS ee ku saleysan shuruudaha IASC waxaa loo sameeyay in lagu taageero falanqayntaas iyo qorshaha noocaas ah. Waxaa loo isticmaali karaa bar bilow ahaan, hagaajin, oo looga heergelin kara xaaladaha maxalliga ah iyo waaqica jira.**
5. **Isku darista tirakoobka barakaca iyo tirakoobka qaranka iyo qiimeynta saboolnimada ayaa fure u ah in lagu kabo siyaasada iyo qorshooyinka heer qaran iyo heer degmo.**

Ogsoonow in qoraallada fududeynta iyo talooyinka iyo sidoo kale farriimaha muhiimka ah ay ku jiraan bog kasta oo ku jira sanduuqa qoraalka.

Habka Gudbinta

Qaabdhiska casharka

Awood-bixiye gaaban oo ku saabsan aragtida guud iyo isuduwidda si loogu bilaabo kulanka 3aad: Weydii ka qaybgalayaasha inay ku sawiraan astaantooda qaranka ama astaamaha kooxdooda kubbadda cagta ee qaranka warqaddaha la roga ayagoo xushmaynaya sharciyada soo socda:

- Qalinku waa inuu had iyo jeer sii saarnaadaa warqadda.
- Dhamaan xubnaha kooxda waa inay sawiraan.
- U sheeg in ay si xeeladeysan ugu socdaan hab isku duwan

Dhamaadka, markay dhammeeyaan sawiradooda, weydii kooxaha kala duwan sida ay ku socdeen. Fikrad ahaan, waxay ku heshiin lahaayeen sawir (aragti guud) ka dibna go'aamin lahaayeen cidda kasta iyo waxa ay samaynayso inta lagu gudajiro hawsha sawirka. Tani waa sida loo horumariyo qorshooyinka daneeyayaasha badan. Waxaan hada ku bilaabaynaa talaabooyinka u horeeya ee diyaarinta: diyaarinta ama horumarinta aragti guud ama sheeko ay kabayso xog leh tayo, la cusboonaysiiyay, la wadaago oo wadajir ah oo ku aadan bulshooyinka uu saameyey barakaca iyo goobta la xushay.

Kadib, kulankan waxaa loo qaybiyaa 4 qaybood:

1. **Maxay tahay sababta loo uruurinayo loona falanqeynayo xog:** Kani waa hal bog oo ah qayb is dhexgal ah oo dib loogu soo celinayo "maxaan ugu baahanahay xog iyo falanqeyn si aan u qorsheyno xalalka ku saleysan aagga".
2. **Waa maxay xogta oo maxay tahay falanqaynta xalka ku saleysan aagga?** Qaybtani waxay ku bilaabmaysaa hawl ujeeddadeedu tahay inay ka-qaybgalayaasha ka fikiraan nooca xogta aan u baahan nahay inaan ku sameyno falanqayn xalalka waara. Farriimaha ugu waaweyn ee ka imanaya qaybtan ayaa ah in gorfeynta ku saleysan aag ay ka kooban tahay uruurinta iyo falanqaynta xogaha laysbarbardhigi kara iyo kuwa kala geddisan iyo macluumaadka ku saabsan Dadka uu Barakacu Saamayey. Waxay sidoo kale u baahan tahay macluumaad ku saabsan sifooyiinka gaarka ah ee meelaha ay ku nool yihiin, sida adeegga iyo awoodda kaabayaasha. Xogtaan iyo gorfeyntan waa in la wadaago lana dardar geliyo si loogu kabo qorshayaasha xalalka mustaqbalka fog ee wadajirka ah ee ku lug leh hawl wadeeno badan si looga falceliyo baahiyaha bulshoyinka uu saameyey barakaca. Tusaalooyinka ururinta iyo falanqaynta noocan oo kale ah ee Soomaaliya waxaa lagu soo qaatay qaybtaan: Tilmaamaha Muqdisho oo la fuliyay 2016 iyo tusaha magaalooyinka ayaa lagu qabtay magaalooyin kala duwan iyadoo loo marayo qaab dhismeedka mashaariicda Midnimo. Qoraalka ku saabsan macluumaadka muhiimka ah ee la soo ururinayo ayaa la qaybin karaa marxaladdan marka la soo gaaro
3. **Habka iyo aaladaha lagu fulinayo falanqaynta xalalka ku saleysan aagga:** Qeybtaan waxaan ku soo jeedin doonnaa talooyin hab-raac ah oo ku saabsan sida loo sameeyo falanqaynta xalalka ku saleysan aagga waxaana ka wada hadli doonaa aaladaha dhowaan loo soo saaray:
   - Abuur aragti guud oo deg deg ah oo ku saabsan horumarka xagga xalalka sida qaab-dhismeedka xalalka ReDSS iyo ku dhaqankiisa ee xaaladaha gaarka ah iyo barnaamijyada ku saleysan aagga eek a jira Soomaaliya (LORA) Hawl ikhtiyaari ah ayaa lagu soo jeedinayaa halkaas. Hadafkeedu waa in laga dhigo kaqeybgalayaasha kuwo aqoon u leh tilmaamayaasha/halbeegyada cabira xalalka waara. Qoraalka ku saabsan qaab-dhismeedka ReDSS, tilmaamayaasha iyo yoolalka horumarka waara ayaa loo qaybin karaa inta lagu jiro qaybtan, dhammaadka hawsha haddii aad maamusho.
4. **Taageerida dowladda qaranka in loogu daro barokacyada ka dhaca nidaamyadooda tirakoobka qaran**, qiimeynta saboolnimada iyo qorshooyinka horumarinta qaran.

Wakhtiga

2: Kulankaan waxaa loo qorsheeyay inuu socdo hal saac ilaa hal saac iyo bar, iyadoo kuxiran inaad hawl wado

- Qiyaastii 40 daqiiqo labada qaybood ee ugu horreeya oo ay ku jirto hawshu
- Qiyaastii 20 daqiiqo qaybta ugu dambeysa bilaa firfircoon 2 iyo 50 daqiiqo haddii aad socodsiiso waxqabadka 2.

Hawlaha

1. **Hawsha 1aad: Xog noocee?**
   Hawl ka kooban 3 tilaabo :
- Weydii ka qaybgalayaasha in ay si gaar ah u fikiraan 5 daqiiqo oo ay liis gareeyaan xogta iyo macluumaadka ay u maleynayaan in loo baahan doono si loogu sameeyo falanqeynta xalalka waara.
- Weydii inay fikradahooda laba-labo ula wadaagaan deriskooda shan daqiiqo oo kale
- U sheeg iyaga inay isku daraan fikradahooda kooxahooda (shaxyo) 10 daqiiqo gudahood iyagoo isku dayaya inay isu kooxeeyaan si macquul ah oo ay ku qoraan natiijooyinkooda warqada la rogo.
  Is-xog wareysi guud: Aan ka badnayn 2 daqiiqo kooxdiiba.

2. **Hawsha 2aad: Tilmaamayaasha xalalka waara. (ikhtiyaari ah).** Kaliya samee hawshan haddii ay waafaqsan tahay ujeeddooyinka tababarka isla markaana waafaqsan tahay baahiyaha waxbarasho ee dhagaystayaasha bartilmaameedka ah.
   Hawlaha Kooxda: U qoondee koox kasta hal ama laba shuruud oo ka codso inay soo saaraan laba tilmaame oo cabbiri kara horumarka loo qaadayo dhanka xalalka waara ee shuruudahaan. Ku qor shuruudaha tilmaamayaasha SMART (Hoos ka eeg sharaxaada) ah warqad-gacmeed la rogo si aad uga caawiso inay horumariyaan tilmaamayaal ku haboon.
   Gaar ah: Si fiican u qeexan, cad, oo aan mugdi ku jirin
   La Cabbiri karo: waa hab la taaban karo (% ama wax kale.) Si loo cabiro horumarkaaga xagga fulinta shuruudaha
   La Gaari karo: La gaari karo oo aan ahayn mid aan macquul ahayn in la gaaro
   Ku haboon: macquul ah, dhab ah isla markaana kheyraad leh, natiijooyin ku saleysan
   Waqtiga kuxiran: Iyadoo leh waqti go'an oo qeexan, oo ay kujirto taariikhda bilowga iyo taariikhda dhamaadka.

Diyaarinta

☐ Kala hadal qabanqaabiyaasha iyo la-hawlgalayaashaada hawlaha aad isleedahay waa ku habboon yihiin in lagu qabto marka la eego xaaladaha tababarka.

- ☐ Daabac qoraalada casharada ku sabasan macluumaadka muhiimka ah si aad u ururiso una falanqeyso. Mid ka qaybgale kasta.
- ☐ Daabac qaabdhismeedka iyo tilmaamayaasha ReDSS. Mid ka qaybgale kasta

Xog Faaido leh

- ☐ Bogga intarneetka ee qaabdhismeedka xalka ReDSS: https://regionaldss.org/index.php/research-and-knowledge-management/solutions-framework/
- ☐ Casharrada laga bartay seddexda dalada EU RE-INTEG Consortia (EIDACS, JSC, SDSC), ReDSS, Oct 2019
- ☐ Habka daneeyayaasha badan ee wax looga qabanayo barakaca magaalooyinka Soomaaliya, Mohamed Taruri, Laura Bennison, Shezane Kirubi and Aude Galli, FMR 63, Cities and Towns, Feb. 2020.
- ☐ Maktabadda tusayaasha ay wadaagaan hay'adaha, ayaa laga galaa halkan: http://inform-durablesolutions-idp.org/indicators/
- ☐ Buugga Falanqaynta Xalalka Waara, Qalab lagu cabiro horumarka loo wajahayo xalalka waara ee Barakacayaasha, Abriil 2018, oo laga heli karo halkaas: https://inform-durablesolutions-idp.org/guidance/
- ☐ Diiwaan gelinta Barakcaa Gudaha ee Muqdisho, Abriil 2016, Warbixin.
- ☐ Danwadaag. Dhanka xalalka waara ee barakaca. Cabirka dhamaadka barakaca: barashada so baxeysa Soomaaliya. https://regionaldss.org/wp-content/uploads/2020/12/Danwadaag_Measuring-the-End-of-Displacement-Emerging-Learning-from-Somalia.pdf
- ☐ Fududeynta Xalalka Waara ee Soomaaliya. Khibradaha mashruuca Midnimo-I iyo adeegsiga Badbaadada Aadanaha, Sanduuqa Qaramada Midoobay ee Amaanada ee Amniga Aadanaha: https://unhabitat.org/sites/default/files/2020/10/202010_midnimo_handbook.pdf